

Heerarka loogu talagalay Buuxinta Qiyaasta Hab dhaqanka Laqabsashada ee SIB-R / ICAP Guidelines for Completing the ICAP / SIB-R Adaptive Behavior Scale

Qaybta hab dhaqanka laqabsashada ee ICAP waxay qiimeynaysaa xirfadaha nolosha maalin laha ah ee macamiilka iyo oggaanshaha macamiilka ee *goorta* la gudanayo xirfadahan. Hadafku wuxuu yahay in la oggaado awoodiisa/awoodeeda. Dhibicda hab dhaqanka laqabsashada ee macamiilka waxaa dhici karta in la xadido haddii uusan lahayn awooda garashada ama oggaanshaha ee ah marka si sax ah loo qabanayo xirfad ayada oo aan la weydiinin ama si joogto ah loo soo xusuusunin.

Sameeyo (ama u sameeyo) hawsha si buuxda asaga oo aan helin caawimaad ama horjoogid

Ma tahay hawsha mid gebi ahaanba macnaheedu tahay dhammaan qaybaha hawsha ah. Qaar kamid ah qalabka hab dhaqanka laqabsashada ee ICAP waxay leeyihiin wax hal qayb ka baddan. Haddii uu qofku ku sameeyo qayb kamid ah hawsha si wanaagsan, laakiin mida kale uu dhexdhexaad ku yahay, qalabka wuxuu u qiyaasayaa sidii ayada oo loo sameeyay kaliya si wanaagsan.

Sameynaya. Xaalado ay aad u yartahay waxaa jiri kara qalab sheegaya in codsadhaha uu ku guuleystay ama ugu guuleystay si qayb ah laakiin aanan haysanin fursad uu ku qabto hawsha. Dabcan hawshu waa mid aanan la heli karin, lid ku ah xeerarka, ama waxaa dhici karta in ay tahayba “qofkale shaqadiisa.” Xaaladaan haddii ay dhacdo waxaa la qiyaasaa sida wanaagsan ee uu qofku u sameynayo hawsha, hadda, ayada oo aan jirin tababar dheeraad ah, caawimaad, ama horjoogid, haddii fursada la siiyo.

Caawimaad ama horjoogid la'aan. Midaan macnaheedu waxay tahay in codsadhaha uu u qabto hawsha si madax banaan. Waxaa la oggolyahay xusuusin halmar ah ama dhakhso ah. Si kastaba codsashooyinka soo noq-noqda, ama xusuusinta ama bilaabida tallaabo-tallaabada ah waxay u dhigantahay caawimaad ama horjoogid.

Gudaha mid kasta oo kamid ah qaybaha hab dhaqanka laqabsashada afarta ah ee ICAP, qalabka waxaa loo amray sida adayg dhexdhexaad ah laga bilaabo heerarka dhallaanka illaa qofka weyn ee qaan-gaarka ah. Qalab kasta waxaa dhibic loo siiyaa qiyaas ah laga bilaabo 0 illaa 3 ayada oo ay ku tiirsantahay awooda macamiilka uu ugu qabanayo hawsha asaga oo aan haysanin caawimaad ama horjoogid.

U sameeya si wanaagsan. Midaan waxay sheegaysaa in hawsha loo dhameeyay si madax banaan. Macamiilka hawsha wuu ku guuleystay ama wuu iska dhaafay in uu hawsha qabto sababtoo ah aad ayay u fududahay (tusaale ahaan, inta baddan wuxuu wax ku cunaa fargeetada bedelka qaadada; inta baddan wuu socdaa, ma guur-guurto). Qofku wuxuu sameeyaa dhammaan qaybta oo dhan asaga oo aan haysanin caawimaad ama horjoogid.

Marwalba ama inta baddan marwalba - asaga oo aan la weydiinin. *Marwalba* macnaheedu waxay tahay markasta oo ay suurtoagal tahay in sidaasi la sameeyo. *Asaga oo aan la weydiinin* macnaheedu waxay tahay in aysan jirin wax ka baddan xusuusinta caadiga ah. Codsadhaha waa in uu leeyahay xirfada *oona* garanayo marka la isticmaalayo, sida waafaqsan heerarka bulshadeed ee caadiga ah. Dhib malahan haddii uu qofku si munaasab ah u weydiisto oggolaansho kahor inta uusan hawsha bilaabin.

U sameeya si dhexdhexaad ah. Midaan waxay sheegaysaa in codsadhaha uu u qabto dhammaan qaybaha hawsha si macquul ahaan u wanaagsan asaga oo aan helin caawimaad ama horjoogid.

Ama $\frac{3}{4}$ oo wakhtiga ah – ayaa dhici karta in loo baahdo in la weydiyo. Midaan waxaa loo macnayn karaa in laga wado in hawsha loo sameeyay si dhexdhexaad ah, in si wanaagsan loogu sameeyay $\frac{3}{4}$ oo wakhtiga ah, ama in la sameeyay ayada oo aan la haysanin caawimaad ama horjoogid $\frac{3}{4}$ oo wakhtiga ah. Dhib malahan haddii codsadhaha uu u baahanyahay in la weydiyo ama lasoo xusuusiyo si uu hawsha u bilaabo.

Sameeyay, laakiin aanan wanaagsanayn. Midaan waxay sheegaysaa in codsadhaha mararka qaar uu sameeyo ama isku dayo in uu sameeyo dhammaan qaybaha oo dhan asaga oo aan haysanin caawimaad ama horjoogid, laakiin natiijadu aanan wanaagsanayn.

Ama $\frac{1}{4}$ oo wakhtiga ah – ayaa dhici karta in loo baahdo in la weydiyo. Midaan waxaa loo macnayn karaa in laga wado in hawsha la qabtay laakiin aanan loo qabanin si wanaagsan, in si wanaagsan loogu sameeyay $\frac{1}{4}$ oo wakhtiga ah, ama in la sameeyay ayada oo aan la haysanin caawimaad ama horjoogid $\frac{1}{4}$ oo wakhtiga ah. Dhib malahan haddii codsadhaha uu u baahanyahay in la weydiyo ama lasoo xusuusiyo si uu hawsha u bilaabo.

Marna ama si dhif ah. Midaan waxay sheegaysaa in hawsha ay aad u adkayd, in codsadhaha aanan loo oggolaanin in uu hawsha qabto sababtoo ah hawshu ma ahan mid ammaan ah, ama in qofka uusan weligiisa ama ay dhif tahay in uu qabto dhammaan qaybaha hawsha.

Xitaa haddii la weydiyo. Marna uma samaynayo si wanaagsan, xitaa haddii la weydiyo ama caawiyay.

Sidee ayuu u “fiicanyahay?”

ICAP waxaa loo qaabeeyay 1.764 qof oo aanan-ahayn kuwo curyaamiin ah kuwaas oo da'doodu isugu jirto laga bilaabo dhallaanka muddo kayar seddex bilood jira illaa qof weyn oo qaana-gaar ah. Waalidiintu waxay isticmaaleen qiyaasta heerka ee ICAP midaas oo lagu sharxay kor si ay ugu qiyaasaan carruurtooda (iyo dadka waaweyn si ay ayaga isugu sameeyaan qiyaasta) qalab kasta oo kamid ah ICAP. Waxay arkeen in ay hawshaan noqon doonto mid fudud oona toos ah. Lama siinin, mana weydiisanin ayaga, macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qalab kasta.

Qalabyada hab dhaqanka laqabsashada ee ICAP waa kuwo ah nidaam koritaan. Ayada oo la xadidayo sida wanaagsan ee shayga loo qabtay, waalidiintu waxay isticmaalaan hawlo maaliineed-kooda iyo carruurta kale ee ay isku-da'da yihiin ee ah sida qoraalka lagu xukumayo guusha xiriirka la leh. Qaado, tusaale ahaan, qalabka *Lagu gooyo manqaska ee ah sadarka, adag oona tooska ah*. Midaan waxay tahay xirfad lamid ah 3 sanno jir. **Sidee ayuu u adagyahay sadarka adag? Sidee ayuu u toosanyahay?** Is-dhig booska waalidiinta, adiga oo fiirinaya hawsha lamidka ah mida iskuulka xanaanada. Sadarka adag wuxuu noqon karaa mid lagu sawiro qalinka calaamadeeyaha ah. Goynta tooska ah waxay noqon kartaa mid ahaanaysa gudaha injiga sideedaad ee sadarka.

Haddii aad dhib ku qabtid weeraha sida *fudeyd*, ama *nadiif*, ama *munaasab*, nafsadaada midaan weydii: Muxuu yahay heerka koritaanka la qiyaasi karo ee qalabkan ee loogu talagalay dadka aan-curyaanka ahayn? Muxuu yahay heerka guusha ee waalidka ama macalinka ilmaha ee da'daasi lagu dabakhayo?

Sidee ayuu qolku nadiif u yahay? Waalidiinta qaba carruur da'doodu tahay 11 – 15 sanno jir ay filanayaan in ay carruurtooda bilaabaan in ay fishaan mas'uuliyadan. Muxuu waalidka ilmo dhexdhexaad ah oo da'daan ah u malaynayay marka asaga/ayada uu yiri “wuu sameeyay, laakiin looma sameynin si wanaagsan,” ama “u sameeyay si aad u wanaagsan”?

Dhibaato ayaa mararka qaar imaanaysa marka la qiimeynayo dadka waaweyn ee qaba naafo maskaxeed ama jireed sababtoo ah qoraalka hab dhaqanka wuxuu noqon karaa mid ka duwan sida caadiga ah. Si kastaba ha ahaatee, heerka loogu talagalay guusha wuxuu noqon doonaa mid lamid ah sidii uu ahaa kooxda caadiga ah.

Laqabsashada kala saarida, dabecad xumo, iyo hab dhaqan wada shaqayn la'aan ah.

Haddii uu jiro farqi ama kala duwanaansho u dhaxeeya tayada wax qabadka codsadhaha (tusaale ahaan. Marwalba ama inta baddan marwalba uu u sameeyo si wanaagsan) iyo soo noq-noqodka (tusaale ahaan., ¼ oo wakhti ah), dhibicda waxaa si aasaasi ah loogu salayn doonaa tayada wax qabadka. Diirad saarida qaybta hab dhaqanka laqabsashada ee ICAP ay tahay mid ku saabsan awooda. Qof haddii uu daalo, ama xanaaqo ama degdega mararka qaar diida in uu qabto hawl weli la qiyaasi karo *Sameeyay si wanaagsan ayada oo aan la weydiinin* haddii ay xirfadu tahay gudaha awoodiisa oona badanaa hawsha u qabta si wanaagsan. Haddii ay diidistu sii jirto laakiin lagu dabakhayo kaliya hawlaha laqabsashada gaarka ah ee yar, inta baddan waxay kordhin kartaa qiyaasta laqabsashada codsadhaha ee ah hal meel oo ku saabsan qalabyadan gaarka ah. Daryeelkan wada shaqayn la'aanta ma ahaan doonto mid sidoo kale loo qiyaaso sida mushkilad hab dhaqan.

Hab dhaqanada soo dhexgalaya hawlaha maalin-laha ah ee codsadhaha ama hawlaha dadka asaga/ayada ku wareegsan ay khasab tahay in loo qiyaaso sida mushkilado hab dhaqan, *ma ahan* sida waayida hab dhaqanka laqabsashada. In la diido qabashada hawlaha lagama maarmaanka ah kuwaas oo ah gudaha awooda qofka, mararka qaar lagu magacaabo u hoggaan-sanaan la'aanta hab dhaqanka wada shaqayn la'aanta ah, waxaa dhici karta in lagu qoro qaybta hab dhaqanka mushkilada ee ICAP haddii diidistu ay tahay mid ku filan si loo sameeyo mushkilad joogto ah oo ah guud ahaan inbaddan oo xirfadaha laqabsashada. Xaaladan wada shaqayn la'aanta codsadhaha ma ahaan doonto mid ka leexinaysa dhibcahiisa/dhibcaheeda qalabka hab dhaqanka laqabsashada, midaas oo loo qiyaasi doono si kusalaysan awooda aanan ahayn wada shaqaynta.

Tixgelino kale

Naafu jireed

Haddii naafada jireed ee codsadhaha ka celinayso ayada in ay qabato hawsha caawimaad la'aan, xitaa waloow ay tahay gudaha awoodeeda maskaxda ah, hawsha waa in lagu qiyaaso “marna ama si dhif ah” (ama in ay tahay heerka dhexdhexaadka ah). Codsadhaha wuxuu noqon karaa mid la ciqaabo ama abaal marin la siiyo naafada nafteeda darteeda. Qofka isticmaalaya kursiga curyaanka, tusaale ahaan, ay tahay ama aysan ahayn mid qaadanaya deynta qalabka sida *Qaadashada iyo qaadista bac wayn oo raashiin ah*, ayada oo ay ku tiirsantahay haddii uu u samayn karo hawsha si madax banaan.

Isticmaalka qalabka laqabsashada

Haddii uu codsadhaha u isticmaali karto qalabkeeda laqabsashada, yacnii. ayadu waxay isticmaalaysaa qalabka laqabsashada caawimaad la'aan, ugu samee dhibic qalabka sidii asaga oo dhab ahaantii loo qabtay. Haddii ay xiranayso ookiyaale, sidee ayay wax ugu arkaysaa ookiyaalaha? Sidee ayay ugu socon kartaa usheeda? Sidee ayay wax ugu cunaysaa qaadadeeda, xitaa haddii ay tahay qaadadu mid laqabsasho ah?

Daawaynta

Tixgeli daawooyinka lamidka ah qalabka laqabsashada, sida ookiyaalaha ama qalabka maqalka. Sidee ayaa codsadhaha wax ugu qabtaa caawimaada lagu caawiyo daawadeeda?

Qaabab xiriir bedelaad ah

Isticmaalka luuqada dadka indhoolaha ah (laakiin aanan ahayn tilmaamid yar) ayaa loo tixgelinayaa in ay tahay mid u dhiganta hadalka. Buuggaag wada xiriir, sabuurado, iyo qalab ayaa loo tixgelin karaa in ay noqdaan kuwo u dhigma hadalka kuwaas oo la bixiyo ayaga oo ay ku qoranyihiin ereyo baddan oo la isku geeyo si ay u noqdaan jumlado. Ayada oo la tilmaamayo ereyga ama calaamada “halka” iyo ereyga goonida ah ama calaamad “ri”, tusaale ahaan, u dhiganta su'aasha fudud. Ayada oo la tilmaamayo calaamada loogu talagalay jaakada ama calaamada su'aasha ee aanan u dhigmin su'aasha fudud.

La weydiyay

Qalab ICAP yar, inta baddan qalab yar oo u dhow biloowga goobta, loogu qabto si lamid ah kaliya jawaabta su'aasha (tusaale ahaan. *Sheegaya taariikhda dhallashada*). Xaaladaan hab dhaqanka waxaa loo qiyaasi karaa *Sameeyay si wanaagsan* xitaa waloow qofka uu ka jawaabay su'aasha.

Hawshu waa mid aad u fudud

Qofku ma qabanayo hawsha sababtoo ah aad ayay ugu fududahay asaga/ayada. Qalabka aadka u fudud ee loogu talagalay qofka waa in ay ahaataa mid marwalba loogu sameeyo dhibcaha sida *U sameeyay si wanaagsan* (3). Tusaale ahaan, haddii uu qofku u sameeyo si wanaagsan hawsha dhar xirashada si buuxda oona nadiif ah markaasi qalabka *Gacmaha kor u qaadaya iyo lugaha marka dharka la xiranayo* ay noqonayso mid aad u fudud oo loogu talagalay qofka waana in lagu siiyo dhibcaha 3.

Hawsha leh wax ka baddan hal qayb

Haddii hal qayb oo ah hawsha leh qaybaha-baddan loo dhameeyay si wanaagsan, laakiin kaliya qayb kale loo sameeyo si dhexdhexaad ah, qalabka waa dhibicda loogu sameeyo sida *Dhexdhexaad*. Haddii ay jirto hal qayb oo hawsha ah midaas oo qofka uusan samayn karin gebi ahaanba, hawsha waa in loo qiyaasaa sida *Marnaba ama si dhif ah*.

Ma lahan Fursad

Haddii aan codsadhaha haysanin fursad uu ku qabto hawsha ama loo oggolaanin in uu isku dayo hawsha midaas oo ay sabab u tahay cunsurada aanan ahayn heerkiiisa/heerkeeda xirfada, tusaale ahaan haddii ay hawshu lid ku tahay xeerarka guriga, ama ay hawshu tahay “shaqada qofkale,” qiyaasta haddii iyo sida wanaagsan ee uu qofku u dhammeeyo hawsha wakhtiga hadda ah haddii la siiyo fursada.

Caawimaada ama sharaxaada

Waxaa jiri kara qalab ICAP ah midkaas oo aanan codsadhaha la weydiinin in uu hawsha qabto. Sharaxaada hawsha ee qofka ee loo sameeyo ujeedo sharaxaad ah oo lagu sharxayo waxa aad ka doonaysid asaga/ayada in uu sameeyo looma tixgelinayo in ay tahay tababar ama horjoogid.

Badbaadada

Haddii codsadhaha aanan loo oggolaanin in uu qabto hawsha midaas oo ay sabab u tahay heerkiisa wax qabadka iyo/ama xukumida ayaa soo jeedin kara hanjabaad ammaankiisa ku aadan, qalabka waa in uu loogu sameeyo dhibicda sida *Marnaba ama si dhif ah* (ama dabcan heer dhexdhexaad ah). Maadaama ilmaha uu gaari karo oona rogi karo batoomada kariyaha cuntada, tusaale ahaan, macnaheedu ma ahan in uu kariyaha u samayn karo si madax banaan.

Horjoogida

Horjoogida ah in codsadhaha uu qaato waxay noqon kartaa wax ka baddan ama ka yar waxa ay ayadu u baahantahay, ayada oo ay ku tiirsantahay tirada guud ee horjoogida kajirta guriga ama xarunta. Si kastaba, hab dhaqanka codsadhaha waa in qiyaas loogu sameeyaa si kusalaysan awoodeeda ay ugu qabanayso hawlaha si madax banaan, ma ahan heerka guud ee horjoogida ama heerarka guud ee xarunta.

Weydiisto oggolaansho

Codsadhaha laguma ciqaabay in uu si wanaagsan u weydiisto oggolaansho kahor inta uusan bilaabin hawsha. Xitaa walow qofka uusan u bilaabin hawsha si gebi ahaanba asaga kaliya ah, wuxuu bilaabayaa hawsha asaga oo u raadinaya si wanaagsan oggolaansho.

Oggaanshaha, xammaasada, iyo filashooyinka bulshada

Si aad u heshid dhibicda ah *U sameeyay si wanaagsan*, codsadhaha wuxuu u baahanyahay awooda uu ku qabto hawsha, oggaanshaha marka hawsha loo baahanyahay, iyo xammaasada lagu qabanayo hawsha, ayada oo la fiirinayo filashooyinka dadka asaga ku hareersan. Qalab ah sida *Nadiifinta qolka jiifka ayaa* halkan u noqon karta tusaale wanaagsan.

Ilmo yar ama qof weyn oo aad curyaan u ah midkaas oo aanan lahayn **awood** uu ku hagaajiyo sariirta waxaa dhibic loogu sameyn doonaa sida *Marnaba ama si dhif ah*, ayada oo aan la eegaynin oggaanshaha ama xammaasada.

Qof leh awooda uu ugu nadiifiyo si wanaagsan, dabcan kadib tababar ballaaran oo tallaabo-tallaabad ah, laakiin aanan u raaci karin jadwalka si madax banaan oona haysanin **oggaanshaha** ah marka ama haddii xirfadu ay tahay mid lagama maarmaan ah (ayaga waxaa khasab ku ah in marwalba la weydiyo), waxaa khasab ah in dhibic loogu sameeyo wax ka yar *U sameeyay si wanaagsan asaga oo aan midaasi laga codsanin*.

Qof weyn oo madax banaan midkaas oo marwalba ka dhigaya guriga mid nadiif ah waxaa qiyaas loogu sameynayaa sida *U sameeyay si wanaagsan asaga oo aan midaasi laga codsanin*.

Qof weyn oo madax banaan midkaas oo inta baddan qolkiisa jiifka uu yahay mid aan nadiif ahayn, xitaa marka saaxiibadiisa ugu dhow ay u yimaadaan, laakiin si wanaagsan loo nadiifiyo kahor inta aysan noqonin mid nadiif ah iyo kahor inta aan la helin la joogid ama wehelin khaas ah, waxaa weli qiyaas loogu samayn karaa sida *U sameeyay si wanaagsan* haddii soo noq-noqodka nadaafada uu yahay gudaha baaxada caadiga ah ee **filashooyinka bulshadeed** ee loogu talagalay qofka weyn ee aanan curyaanka ahayn ee ku sugan isla xaalada noloshaas oo kale.

Xubin kale oo guriga ku nool midkaas oo leh awood uu ugu nadiifiyo qolka si wanaagsan, midkaas oo marwalba ka dhigaya ugu yaraan mid caafimaad leh, laakiin guud ahaan u nadiifiya inta baddan sida uu qorayo xeerka guriga, sida waafasan jadwalka, ama “marka ay shirkadu timaado,” ayaa weli qiyaas loogu samayn karaa sida *U sameeyay si wanaagsan* haddii asaga uu marwalba ama inta baddan u hoggaansamo **filashooyinka qoyska** oo aanan lahayn wax ka baddan faalo marmar ah ama xusuusin.

Qof leh awood uu ugu nadiifiyo si wanaagsan, laakiin aanan u raacin jadwalka si madax banaan oona inta baddan ku guuldaraysta in uu qabto xirfada xitaa marka filashooyinka bulshadeed ay si cad u sheegayaan, oggaansho la'aan ama in ay jirin **xammaasad**, dabcan xiriir la leh mushkilad caafimaad maskaxda ah, ayay khasab tahay in dhibic loogu sameeyo sida wax ka yar *U sameeyay si wanaagsan asaga oo aanan midaasi laga codsanin*.

Qofkee buuxinaya ICAP?

Waalid kasta, macalin, ama qof daryeel bixiya qofkaas oo si fiican u garanaya qofka qiimeynta lagu sameeyay ayaa bixin kara macluumaadka loo baahanyahay si loo buuxiyo ICAP. Sida heer ahaan qorayaashu waxay soo jeedinayaan in haddii jawaab celiyaha ay isku dhexgaleen qofka qaab maalin-le ah ugu yaraan seddex bilood asaga/ayada ay khasab tahay in uu u oggaado codsadhaha si wanaagsan si uu u buuxiyo qalabka hab dhaqanka laqabsashada ee ICAP ayada oo ay kusalaysantahay aqoontiisa/aqoonteeda shakhsiyeed ee uu u leeyahay qofka. Jawaab celiyaha ayaa u buuxinaya buuggyaraha ICAP si toos ah (haddii uu garanayo heerarka iyo tilmaamaha aasaasiga ah ee loogu talagalay buuxinta ICAP ee ku yaala Lifaafa D ee Buuggyaraha ICAP), ama siin kara macluumaadka qofka waraysiga qaada sida shaqaalaha bulshada. Muhiim ma ahan dhab ahaantii sida ama qofka macluumaadka helaya maadaama macluumaadku ay yihiin kuwo ku saabsan qofka iyo hab dhaqankiisa uu yahay mid hadda ah oona sax ah. Jawaab celiyayaal baddan ayaa lala tashan karaa.

Maxaan sameeyaa haddii aan oggahay in jawaab celiyaha uu yahay mid aad u taxadir baddan ama qof khiyaano wada, ama Aniga aanan oggolayn?

Waalidka aadka u taxadirka baddan wuxuu dhihi karaa "Sidaasi wuu samayn karaa, laakiin anigu uma oggolaanayo in uu sameeyo." Jawaab celiyaha khiyaanada wada wuxuu dhihi karaa "Sidaasi wuu samayn karaa laakiin ma samaynayo..." Labbada xaaladba mida ay noqoto, hadafku wuxuu yahay in la helo oona la qoro macluumaadka hadda ah oona saxda ah. Weydii su'aalo dheeraad ah si aad u go'aamisiid haddii codsadhaha uu ku guuleystay xirfada iyo sida wanaagsan ee uu dhab ahaantii ugu qaban karo hawsha si ammaan ah haddii la siiyo fursada. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, la tasho jawaab celiyayaal kale oo dheeraad ah (waalid, macalin, qof shaqaale ah, ama dabcan codsadhaha naftiisa) illaa aad kaga qanacdid in macluumaadka aad qoraysid ay uga tarjumayaan hab dhaqanka saxda ah ee codsadhaha xaaladaha caadiga ah.

Maxaa dhacaya haddii qalab ama shay laga tago asaga oo banaan?

Dhibicda imtixaanka lama qorayo haddii qalabka ama shayga laga tago asaga oo banaan. Calaamad u saar jawaab kasta qalabka ama shayga hab dhaqanka laqabsashada ee ah afarta meelood (77 qalab).

Maxaan sameeyaa haddii aanan garanaynin waxyaabaha ku saabsan wax qabadka qofka ee qalab ama shay khaas ah?

Haddii aadan helin fursad aad ku fiirisid hawsha wax qabadka codsadhaha, ama haddii codsadhaha uusan helin fursada ama mas'uuliyada uu ku sameeyo hawsha, weydii qofkale oo arintaasi fiiriyay, ama qiyaas haddii iyo sida wanaagsan ee uu codsadhaha u qabanayo hawsha hadda asaga oo aanan haysanin caawimaad ama tababar dheeraad ah. Ku dhis qiyaastaada macluumaadka ama fiirinta waxqabadka qofka ee ku saabsan hawlaha xiriirka la leh ama lamidka ah.

Ka waran xanuunada ama dhaawaca kumeel gaarka ah ee saameeyay hab dhaqanka?

Guud ahaan, u qiyaas waxqabadka dhexdhexaadka ah ee codsadhaha inta lagu guda jiro bisha ugu dambaysa. Si loogu kalsoonaado, imtixaanka waa in lagu qiyaasaa hab dhaqan kala duwan qayb khaas ah oo wakhtiga kamid ah. Haddii ay suurtoogaltahay, dib u dhig qiimeynta illaa qof aad u xanuunsanaa uu ka noqonayo mid xaaladiisu degtay.

Ka waran waxyaabaha ku saabsan xanuunada maskaxda, midkaas oo waxqabadkiisu isbedeli karo wareegyada ama wakhtiba wakhtiga kale?

Guud ahaan, u qiyaas waxqabadka dhexdhexaadka ah ee codsadhaha inta lagu guda jiro bisha ugu dambaysa. Si loogu kalsoonaado imtixaanka waa in lagu qiyaasaa hab dhaqan kala duwan qayb khaas ah oo wakhtiga kamid ah. Haddii ay suurtoogaltahay, dib u dhig qiimeynta illaa codsadhaha aadka u xanuunsanaa uu ka noqonayo mid xaaladiisu degtay.

Haddii bisha u dambaysa ay tahay mid hab dhaqan caadi ah-oo sannadka oo dhan ah, sida ayba noqon karto xaalada mushkiladaha caafimaadka maskaxda kuwaas oo hadda ah (ama aanan ahayn) kuwo xasiloon, darnaanta horjooge ayaa loo baahnaan karaa si loogu kala bixiyo guud ahaan sannadka oo dhan looguna aadiyo hab dhaqanka. *Midaan waa su'aal siyaasadeed, ee ma ahan su'aal qiimeyn.* Siyaasada, gaarka ku ah gobol kasta ama wakaalad kasta, waxaa kamid noqon kara dhammaan "xaalada ugu xun" iyo "xaalada ugu fiican" ee ICAP, ee ay la socoto hawlaha lagula dhaqmayo maamulida xaalada sannadka-oo dhan ah.

Ka waran waxyaabaha ku saabsan kafa'ideysiga galmo ee carruurta ama gubida ula kaca ah ama qofkale uu hab dhaqankiisa laqabsashada uu yahay mid aad u sareeya laakiin madax banaaniisu ay ku xadidantahay baahida loo qabo horjoogid joogto ah?

Hab dhaqanka laqabsashada codsadaha waa in qiyaasta loogu sameeyaa sida kusalaysan awoodiisa uu ugu qabanayo hawlaha si madax banaan, ee ma ahan heerka horjoogida loogu baahanyahay mushkiladiisa hab dhaqan. Haddii codsadahaasi uu sameeyo (ama ay suurtoqaltahay in uu sameeyo) hawl ah sida *ficilo munaasab ah oo dadka dhexdooda ah oo uu la sameeyo saaxiibada*, waxaa khasab ah in uu midaan dhibic ku qaato qalabkan ama shaygan xitaa waloow ay tahay mid kasoo horjeeda xeerarka ah in uu asaga keligiisa banaanka la aado saaxiibo. Codsadayaasha oo kale waxay u baahanyihiin horjoogid ka baddan sida kaliya uu sheegayo hab dhaqankooda laqabsashada, hab dhaqankooda xun darteeda. Qaar kamid ah gobolada waxay isticmaalaan su'aalo dheeraad ah marka lagu daro dhibcaha ICAP si loogu sharxo heerka horjoogida loogu talagalay duruufahaan ama xaaladahaan gaarka ah. Markale, *midaan waa su'aal siyaasadeed, ee ma ahan su'aal qiimeyn.*